

## RAAD-RAACA XIRIIRKA WAXA UU NAGA CAAWINAYAA INAAN DIB U FURNO OO AAN BADBAADSANAANO

### Waa maxay raad-raaca xiriirka?

Raad-raaca xiriirka waa sida saraakiisha caafimaadka dadweynaha ay ula socdaan dadka la xiriira kiisaska la xaqijiyay ee COVID-19 oo ay weydiistaan inay is baaraan oo ay is gooni-yeelaan.

Si dhaqo ah u oogaanshaha iyo kaarantiilka kiisaska COVID-19 iyadoo la adeegsanaya aad-raaca xiriirka waxay muhiim u tahay in si badbaado qabta dib loogu furo Ontario oo la xakameeyo faafidda fayraska.

Qaab fudud laakiin muhiim ah oo aad ku caawin karto waa adoo taageera raad-raaca xiriirka. Tan macnaheedu waa isticmaalka app-ka raadraaca (contract tracing app) , iyo la socoshada qof kasta oo aad kuhesho xiriir dhow, ha ahaato bulsho ahaan ama meel dadweyne ah sida dukaan ama waddo.

### Way fududahay in la isticmaalo app-ka xiriirka baafinta

Digniinta COVID, App-ka moobilka ee Ontario wuxuu bixiyaa hab dhakhso ah, ammaan ah, ilaalin qarsoodi ah oo lagu ogeysiyo dadka u ku dhacay COVID-19.


Adigoo isticmaalaya Bluetooth, app-ka waxad la wadaagaysaa, si qarsoodi ah oon doorasho ahayn koodhadka ay sameeyaan isticmaalayaasha kale ee app-ka ee ku udhaw.

Haddii baaritaankaagu noqdo waa lagaa helay COVID-19, si qarsoodi ah ayaad u ogeysiin kartaa kuwa kale ee ku ag joogay 14-kii maalmood ee la soo dhaafay.

Haddii lagugu shaciyay COVID-19 isticmaale kale oo app-ka ah, 14-kii maalmood ee la soo dhaafay, waxaad heli doontaa ogeysiis qarsoodi ah.

#### App-ka:

- Ma aha *mid* lagu ururiyo xogta shaqsigaa ama macluumaadka caafimaad ee shaqsigaa
- Ma aha *mid* ururiya ama la socota xogta goobta GPS
- Si otomaatig ah ayey u baabi'ineysaa dhammaan macluumaadka qarsoon 14 maalmood kadib
- Waxaa isticmaali kara aaladaha Android iyo iPhones
- Waxay ku shaqaysaa apps-ka la midka ah meel ka baxsan Ontario



### Ma adeegsan waysay ama ma adeegsan kari waysay app? Waxaa jira qaabab farsamo yar oo lagula socon karo xiriiradaada

Waad la socon kartaa xiriiradaada adoo qaadaya sawirada meesha aad tagtid, ama adoo ku qoraya qoraalada qaab elektaroonig ah ama warqad, sida **OMA's Pocket Diary**.

- Diiwaangeliso goorta iyo meesha aad tagtay, iyo cidda aad la kulantay.
- Ku qor magaca qof kasta oo aad la joogtay 15 daqiiqo ama kabadan fogaan inka yar laba mitir (lix feet).
- Haddii aadan aqoon qofka magaciisa, qor xogta aad hayso, sida *Waxaan wadahalal dheer la yeeshay shaqaalaha qaybta wax soo saarka ee dukaanka 'XX' ee xilliga YY. taariikhda ZZ.*